



FAAFIN DEGDEG AH PREMIER BANK OO LOO MAGACAABAY AGAASIME CUSUB

Muqdisho, Maarso 02 2024:

Dr. Maxamed Geedi Jumcaale oo loo doortay
Agaasimaha Maamulka Premier Bank.

Guddiga maamulka sare ee Premier Bank ayaa si rasmi ah ugu magacaabay Dr. Maxamed Geedi Jumcaale agaasimaha cusub ee Premier Bank. Tallaabadan ayaa looga golleeyahay la jaanqaadidda horumarka iyo isbeddelada dhaqaale ee dalka ka socda iyo hirgelinta qorshayaasha isku ballaarinta bangiga ee gobolka.

Dr. Geedi waa shakhsi firfircoon oo ku xeeldheer maamulka iyo qorshe dajinta, sidoo kalena khibrad qoto dheer iyo waayo-aragnimo u leh istiraatiyad dajinta shirkadaha; Waxa uu darajada 1aad ee jaamacadda ka haystaa maamulka ganacsiga, sidoo kalena waxa uu MBA ka sameeyey cilmiga maamulka shaqada iyo shaqaalaha iyo Qaanuunka, isagoo shahaadada darajada seddexaad ee Ph.D ka sameeyay istiraatiyad dejinta, go'aan qaadashada iyo maamulka.

"Waxaa inoo dhashay waa kale oo cusub, waxaanna hubaa in Premier Bank uu qaaday waddo dalka iyo bangigaba sii horumarin doona intan ka badan, waana in uu helay hoggaan cusub oo aan ku wada kalsoonahay." Waxaa sidaa yiri Chairman-ka Premier Bank mudane Jibril Hassan.

Dr. Geedi ayaa dhanka kale leh khibrad & xirfad bangiyeed oo dhaafsiisan 10 sano oo ku aaddan majaalka maaliyadda iyo qorsheynta maamulkaba. Inta aanan loo dooran agaasimaha Premier Bank, Dr. Geedi wuxuu soo qabtay shaqooyin iyo jagooyin kala cayn ah sida, ku-simaha guddoomiyaha bangiga, guddoomiye ku xigeen, madaxa waaxda shaqada iyo shaqaalaha, waaxda maaliyadda iyo waaxda maalgelinta bangiga.

DHAMMAAD